

HIMILO

staat voor hoop in de toekomst

WARBIXINSANADEEDKA
2013

TUSMO

2. Hordhac	4
3. Taariikhda Himilo	5
b) Nidaamka shaqada.....	6
t) Qaab dhismeedka Himilo.....	7
j) Xubnaha ururka.....	7
4. Waxqabadka Himilo 2013	8
1) Mashruuca Computer lap.....	8
2) Mashruuca Iskuulka Geri Jir.....	9
3) Mashruuca Sakaatul-fidri 2013.....	10
4) Mashruuca Dhisid Barkad Biyo.....	11
5) Arrimaha Bulshada.....	12
5. Xiriirka	13
6. Warbixin Dhaqaalaha 2013	14

2. HORDHAC

HIMILO waa urur samafal oo ay ku bohoobeen bulshada Soomaliyeed ee ku nool waddanka Nederland, kana howlgala Soomaaliya iyo Nederland. Himilo waxaa la aasaasay sanadkii 2006, waxaana loo aasaasay xal u helidda dhibaatooyinka bulsho ee Ummadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan Soomaaliya iyo Nederland. Ururku wuxuu si sharci ah uga diiwaangashan yahay dalka Nederland. Xarunta ururka waa magaalada Amsterdam.

Ujeedada warbixintaan waa in xubnaha ururka ay la socdaan waxqabadka ururka, laguna wargeliyo danleyda ururka waxyaabihii uu qabtay ururku sanadka 2013.

Marka hore waxaan warbixin kooban ka bixin doonnaa taariikhda ururka, sida uu u dhisan yahay ama u shaqeeyo. Marka xiga waxaan ka hadli doonnaa waxyaabihii la qabtay sanadka 2013. Intaa ka dib waxaan warbixin guud ka bixin doonnaa wixii dhaqaalo ah soo galay ururka, wixii ka baxay iyo meelaha ay ku baxeen.

3. TAARIIKHDA HIMILO

Ururka Himilo waa natiijo ka soo baxday fikir ay isku darsadeen saddex qof oo qof walba iskiis howl ama waxqabad isku mid ah ugu mashquulsanaa. Bishii abril sanadkii 2006 waxay saddexdii qof isla garteen inay waxqabadkooda isu keenaan ayna ballaariyaan, waxaana sidaa ku unkamay Ururka Himilo. Saddexdii sano ee u horreeysay ururku horumar badan ayuu sameeyay, iyadoo ka dib uu ku yimid dib u dhac oo ay sabab u ahayd awooddii waxqabad ee xubnaha maamulka oo yaraatay.

Sanadkii 2012, kadib markii codsiyo is daba joog ahi ka imaadeen bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Nederland, gaar ahaan dadka daneeya waxqabadka iyo horumarka Himilo, ayaa lagu sameeyay ururka dib u habayn ballaaran. Maamulka sare ee ururka waa la ballaariyay, nidaamka shaqo ee ururka dib u habeyn ayaa lagu sameeyay. In ka badan 50 xubnood oo si joogta ah ururka deeq u siiya ayaa ururka ku soo biirtay. Howlaha ururkana meel wanaagsan ayay marayaan.

Ujeedooyinka Ururka

Ujeedada guud ee ururka loo aas-aasay waa dib u dhiska iyo horumarinta adeegga aasaasiga ee bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Soomaaliya sida:

- Kor uqaadidda tayada iyo kordhinta goobaha waxbarashada
- Kor u qaadidda tayada caafimaadka, sida abuurista xarumo daryeelka dhallaanka iyo hooyooyinka
- Kobicinta tayada biyaha, sida dayactirid ama samayn ceelal biyo
- Kor u qaadidda wacyiga bulshada, sida samayn xarun wax ka qabata arrimaha deg-degga ee bulsahda sida abaaraha, cudurrada faafa IWM

Ujeedada kale ee ururka waa xal u helidda dhibaatooyinka-bulsho ee bulshada Soomaalida ee ku dhaqan wadanka Nederland.

3. TAARIIKHDA HIMILO

b) Nidaamka shaqada

Nidaamka shaqo ee ururka wuxuu ku salaysan yahay xaqiijinta ujeedooyinka ururka. Howlaha la xiriira dhibaatooyinka-bulsho ee waddankan Nederland wuxuu maamulka ururka kala shaqaynayaa xubnihiisa diyaarka u ah inay ururka iskaa wax u qabso ula shaqeeyaan iyo hay'ada-ha-dowliga ama madaniga ah ee waddankan ka shaqeeya.

Howlaha quseeya wax ka qabadka baahida-bulsho ee Soomaaliya wuxuu maamulku la kaashan doonaa xubnihiisa u leh waaya-aragnimada durug-san meelaha baahiyaha ay ka jiraan iyo baahida wax ka qabadka u baahan.

Baahi walba ee uu ururku wax ka qabanayo waa in codsi qoraal ah ururka lagu soo gaarsiiyaa, iyadoo ka dib gal (fayl) loo samaynayo. Muddo 4-todobaad gudohood ah ayuu maamulka ururku go'aan uga gaarayaa inuu baahidaa wax ka qaban karo iyo inuusan waxba ka qaban karin.

3. TAARIIKHDA HIMILO

t) Qaab dhismeedka Himilo

Ururku wuxuu leeyahay guddi maamula waxqabadka iyo shaqooyinka ururka. Guddiga Maamulka Guud wuxuu ka kooban yahay 7-xubnood. Todobadan xubnood waxay iska dhex doortaan Guddiga-fulinta oo ka kooban 3-xubnood oo kala ah Guddoomiyaha, Xoghayaha iyo Hantidhowraha Ururka.

Ururku wuxuu ku talo jiraa inuu samaysto xubno la-taliyayaal ah iyo iskaa-wax-uqabsadayaal, si ujeedooyinka ururka loo xaqiijiyo. Sidoo kale ururku wuxuu ku talo jiraa inuu gudaha dalka Soomaaliya ka samaysto qof mas'uul uga noqda howlaha uu ururku Soomaaliya ka fulinayo.

GUDDIGA

1. Abdullahi Mohamud Jimale
2. Shukri Abdulkadir
3. Abdikarim Mohamud
4. Ahmed Wali Gure
5. Ali Hassan Mohamed
6. Mohamed Bashir Osman
7. Hamdi Mohamed Siyad

GUDDIGA FULINTA

- Abdullahi Mohamud Jimale
(*Guddoomiye*)
- Shukri Abdulkadir
(*Xoghayn*)
- Abdikarim Mohamud
(*Hantidhowre*)

j) Xubnaha ururka

Ururka wuxuu leeyahay xubno deeq-bixiyayaal ah. Xubnahaan waxay isugu jiraan kuwo dhaqaale joogta ah bil walba ururka siiya, kuwa waqtigooda, aqoontooda iyo waaya-aragnimadooda ururka uga faa'iideeya.

Xubnaha Ururka waa lafdhabarta jiritaanka ururka. Maamulka Himilo wuxuu mar walba ku dadaali doonaa inuu adkeeyo xiriirka ka dhaxeeya xubnaha iyo maamulka.

4. WAXQABADKA HIMILO 2013

1) Mashruuca Computer lap

SOHDI waa machad hoos yimaada jaamacadda Salaama ee magaalada Muqdisho, dalka Soomaaliya. Waxay naga soo codsadeen inaan u dhiso saddax fasal oo loogu tala galay in lagu barto computer(ka). Waxay codsi-gooda soo raaciyeen in 50% qarashka ay iyagu heystaan, islamarkaana inooga baahnaayeen inaan 50% kale la raadinno.

Himilo ayaa markii uu mashruucan soo gaaray waxay dalabka SOHDI u gudbisay oo xiriir la sameysay hay'adda Wilde Ganzen, taas oo bixisay qarashka nalaga soo codsaday. Sidaa darteed Himilo jeebkeeda waxba kama bixin oo waxa uu mashruucani u ahaa midkii ugu horreeyay oo aan hay'ad kale gargaar ku weydiisannay.

Waxaa machadka loo iibiyay 70 PC, 4 printer, iyadoo Hantidhowraha Himilo uu halkaasi booqday, islamarkaana koorsooyin soo siiyay macallimiinta machadkaasi.

Ujeedka Himilo

Mashruucan wuxuu ahaa kii kowaad oo aan hay'ad kala kaashannay, taas oo awood u leh fulinta iyo bixinta qarashka 50%, waxaana faaiidada noogu jirtay aheyd inaan hay'adaha deeqbixiyayaasha ah isku baranno, sidoo kalena howl waxqabad u noqdo ururka oo hay'adaha kale ku qanci karaan.



4. WAXQABADKA HIMILO 2013

2) Mashruuca Iskuulka Geri Jir

Mashruucan Iskuulka Geri Jir waxaa sanadkii 2007 billaabay ururka Galgadud Social Utvilking oo xaruntiisu tahay wadanka Norway.

Codsiga

Sanadkii la soo dhaafay waxaa na soo gaaray codsi ku saabsan baahi dhanka waxbarashada ah oo ka jirta degmada Geri Jir oo ay ku nool yihiin dad badan, kuwaas oo aan haysan goob waxbarasho. Codsigana waxaa Himilo soo gaarsiiyay qaar ka mid ah xubneheeda oo mashruucan si gooni ah ugu mashquulsanaa. Xubnahan waxay iska soo aruuriyeen lacag dhan 1200 euro. Wada hadal ka dib waxay lacagtaasi ku soo wareejiyeen Himilo, waxaana ku kabnay lacag kale, taasoo deeqdii Himilo gaarsiisay 7000 dollar.

Himilo waxay xiriir la samaysay ururka kor ku xusan oo mashruuca iskuulka masuuliyaddiisa lahaa. Waxay inoo sheegeen in iskuulku baahiyo badan qabo, balse tan ugu darani tahay lacag 7000 dollar ah oo la rabo in iskuulka lagu qalabeeyo derbi wareeg ahna loogu dhiso, haddii la helana iskuulku shaqo billaabi doono. Himilo waxay ugu deeqday iskuulka lacag 7000 dollar ah.

Sanad-dugsiyeedkii u horeeyay waxaa iskuulka lagu furay arday dhan 240, iyadoo iskuulkana lagu biiriyay macallimmiin laga keenay magaalada Muqdisho.



4. WAXQABADKA HIMILO 2013

3) Mashruuca Sakaatul-fidri 2013

Mashruuca sakaatul-fidriga waa mashruuc sanadle ah oo ay fuliso Himilo, kaas oo tan iyo intii Himilo dhisneyd si joogta ah sanad walba loo fuliyo, iyadoo sanad kasta fulinta mashruucan lala kaashado deeqbixiyaasha Himilo.

Ujeedka Mashruuca

Ujeedada ugu weyn waa caawinta dadka masaakiinta ah ee sadaqada u baahan, intaa kadibna waxaan ognahay in sakadu tahay tiir kamid ah tiirarka ugu muhiimsan diinta Islaamka.

Xaggee laga fuliyay?

Waxaa inta badan laga fuliyaa gobollada Galguduud, Banaadir iyo Sh/hoose. Sanadka 2013 waxaa laga soo aruuriyay deeqbixiyaasha lacag dhan €694 (lix boqol sagaashan iyo affar euro). Lacagtan ayaa loo kala diray gobollada kor ku xusan, iyadoo loo qeybiyay dad gaaraya 80 qof, iyadoo qofkiiba 25kg oo bariis ah la siiyay.



4. WAXQABADKA HIMILO 2013

4) Mashruuca Dhisid Barkad Biyo

Guddiga Iskuullada Hillaac ee Soomaaliya ayaa naga soo codsaday inaan ugu dhisno barkad biyood iskuul ku yaalla deegaanka Dabagalo oo ka tirsan degmada Xarardheere ee gobolka Mudug.

Nooca dalabka

Barkad biyood oo qaadda 40 fuusto.

Qaabka loo dhisay

Hoos waa shub, derbiyadana bulukeeti dhaxda laga shubay iyo shamiindo lagu sallaxay. Banaanka waa laga rinjiyeeyay, rubuneetooyinka biyaha laga shubi lahaana waa loo yeelay.

Meesha laga dhisay iyo cidda loo dhisay

Waxaa laga dhisay dugsiga Hillaac 2 oo ku yaalla deegaanka Dabagalo oo ka tirsan degmada Xarardheere ee gobolka Mudug. Waxaa barkaddan ka faa'iideysta maalintii 140 qof.



4. WAXQABADKA HIMILO 2013

5) Arrimaha Bulshada

Himilo waxay mar walba isku daydaa intii karaankeeda ah inay baahiyaha bulsho ee xubnaha Himilo ee waddankan Holland wax ka qabato. Dhibaa-tooyinka ay Himilo sanadkan wax ka qabatay waxaa ka mid ah, caawinta/booqashada dadka buka, caawinaadda dadka qareennada dano ka galaan, caawinaadda dadka dhibaato kala kulma caymisyada kala duwan, caawinaadda dadka khameentiyada dhibaato kala kulma.

Dadka aan caawinnay sanadka waxaa ugu muhiimsanaa. Walaalkii looyarka ka caawinnay iyo walaalkii xanuunsanaa oo aan qarashka daawada iyo dhakhtarka ka bixinnay.

Walaalka looyaraka wuxuu ka mid ahaa dadkii bannaanka laga soo dhigay xeryaha qoxootiga. Qareenkiisa oo u dadaalaya ayaa u diray inuu cajalad iska soo duubo si loo baaro soomaalinimadiisa. Duubitaanka cajalada waxaa ku baxayay qarash €3000 ku dhow. Qayb ka mid ah abuukaataha ayaa ka caawiyay. Walaalka wuxuu noola yimid codsi ah inaan ka caawinno lacag dhan €800 oo ka dhimman qarashka duubitaanka cajalada ku baxaya.

Codsiga walaalkeen waxaan u bandhignay xubnaha Himilo, waxaana wax lagu farxo ah in muddo 2 usbuuc gudohood xubnaheenna uga soo jawaabeen codsiga walaalka, sidaana lagu guddoonsiiyay qarashkii uu u baahnaa.

Sidoo kale waxay Himilo sanadka 2013 intii awooddeeda ahayd wax ka qabatay baahida walaal maskaxda ka xanuunsanaa, kana mid ahaa dadkii bannaanka la soo dhigay. Himilo waxay ka caawisay in walaalka dhakhtar la geeyo, daawo loo gado; maaddaama uusan wax caymis ah waddankan ku lahayn.

Maamulka Himilo waxay xubnaha deeqbixiyaasha aad uga mahadcelinayaan sida walaaltinnimada iyo degdegga leh ee ay walaalkeen u garab istaageen iyo weliba walaalihii walaalka xanuunsan gacanta ku hayay.

5. XIRIIRADA

Sanad walba waxaan xiriir la sameynnaa ururro iyo hay'ado kala duwan, waxaana sanadkii la soo dhaafay ee 2013 xiriir la sameynnay ururrada iyo hay'adaha kala ah:

- Van de Bunt adviseurs
- Jaaliyadaha Norway, Sweden, Finland, Germany & Belgium
- Wilde Ganzen
- FSN
- Hillaac Schools

Dalladda Wadajir

Dhamaadkii sanadka 2013 waxay Himilo qeyb weyn ka qaadatay dhisidda dallad ay ku mideysan yihiin ururrada ka dhisan wadamada Holland, Belgium, Germany, Sweden, Finland iyo Norway.

Billowgii dhismaha dalladdaasi waxaa dhacday in khilaaf weyn uu soo kala dhex galay guddiga fulinta ee Himilo, kaas oo ku saabsanaa ka sii mid ahaanshiyaha dalladdaasi. Guddiga ayaa arrintaasi ku kala aragti duwanaaday, waxayna sababi gaartay in guddigu kala tago.

Sidaa awgeed wuxuu guddiga fulinta ee Himilo isla gartay in wax kasta laga hormariyo midnimada Himilo, isla markaasna wax kasta oo burbur iyo kala tag ku keeni kara bulshada Himilo laga ilaaliyo, iyadoo taa laga duulayo ayuu guddiga Himilo go'aansaday in wadashaqeyntii Dalladda Wadajir si kumeelgaar loo joojiyo.

Maamulka Himilo wuxuu isla gartay inuu diyaar u yahay markasta in jaaliyadda Himilo wax la wadaagto jaaliyadaha kale ee Yurub, haddii aaney waxyeello ku keeneynin midnimada walaalaha Himilo.

6. WARBIXIN DHAQAALHA 2013

Overzicht baten en lasten 2013				
Rek.1956128	Saldo op	31-12-2012	€	4.347,12
Kas	saldo op	31-12-2012	€	355,93-
TOTAAL BEGIN SALDO			€	3.991,19
Staat van baten en lasten				
BATEN		2013	2012	
PROJECTEN				
	ICT project Wilde Ganzen	€ 11.031,00	€ -	
	Subtotaal	€ 11.031,00	€ -	
DONATIE				
	Op rekening	€ 5.865,00	€ 3.821,00	
	KAS	€ 295,00	€ -	
	Subtotaal	€ 6.160,00	€ 3.821,00	
VERZAMELACTIES				
	Zakatul-Fidri	€ 694,00	€ 750,00	
	Xaaji leged	€ 800,00	€ -	
	Project Geliir	€ 1.200,00	€ -	
	Subtotaal	€ 2.694,00	€ 750,00	
	Totaal baten	€ 19.885,00	€ 4.571,00	
TOTAAL VERMOGEN 2013			€	23.876,19
KOSTEN				
	ICT project	€ 11.031,00	€ -	
	Geli-Jir project	€ 5.150,00	€ -	
	Hillaac project	€ 1.137,00		
	Activiteitenkosten	€ 843,22	€ 1.045,43	
	Organisatiekosten	€ 520,80	€ 395,40	
	Project Zakatul-Fidri	€ 737,60	€ 750,00	
	Bestuurskosten	€ 23,12	€ 73,00	
	Project Abdiasis Xaji leged	€ 800,00	€ -	
	Kulmiye project	€ -	€ 290,00	
	Totaal lasten	€ 20.242,74	€ 2.553,83	
TOTAAL VERMOGEN 2013			€	20.242,74
verschil baten en lasten				
	Saldo op de REKENING	31-12-2013 €	10.183,89	€ 3.633,45
	Saldo op de KAS	31-12-2013 €	263,44-	
	Totaal Saldo	31-12-2013	€ 3.633,45	Besteedbaar in 2014

Stichting Himilo
Postbus 4443
2003 EK Haarlem
0641419114
info@himilo.org
www.himilo.org
Kvk: 09160117
